Qofka u taga faaliye oo wax waydiiya salaad lagama aqbalo afartan habeen

Waxaa laga wariyey qaar ka mid ah Haweenkii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inay dheheen: "Qofka u taga faaliye oo wax waydiiya salaad lagama aqbalo afartan habeen".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka digayaa in loo tago faaliyaha - faaliyuhu waa magac guud oo ay wadaagaan wax sheega, xidigiyaha, faalka ciida, iyo wixii la mida, ee qaybka wax ka sheegiisa u daliishada wax yaabo hor dhac ah oo ay adeeg sadaan, in wax la waydiiyo kaliya ayuu Ilaahay uga xarimayaa qofka ajarka salaada afartan maalmood, waxaana loogu ciqaabay dambigaa iyo xumaantaa weyn ee uu sameeyey awgeed.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/5986